

## Waa maxay noocyada amarada ee Xaakimka Dhagaysigu dhagaysto?

Amarka lagasoo saaray kuxadgudubka Land Use Code (Sharciga Adeegsiga Dhulka), iyo sharciga Weed and Vegetation Code (Geedaha sunta ah iyo khudaarta) (kaasoo ay soosaartay Department of Planning and Development/DPD, (Waaxda Qorshaynta iyo Hormarinta); amarka lagasoo saaray xadgudubyada kaladuwan oo dhanka isticmaalka wadada ah (ayna soosaartay Seattle Department of Transportation/SDOT, (Waaxda Gaadiidka ee Seattle); iyo amarada lagasoo saaray xadgudubyada dhanka adeegsiga tamarta dhismaha (oo uu soosaaray Office of Sustainability and Environment (Xafiiska Dhulka iyo Bii'ada).



City of Seattle Cidna uma takoorto sababo laxariira isirkiisa, qoomiyadiisa, jinsigiisa, xaaladiisa guurka, dookhiisa galmo, fikirkiisa siyaasadeed, da'diisa, caqiidadiisa, diintiisa, asalkiisa, wadanka uu kasoo jeedo, ama jiritaanka nooc uun kamid ah naafada dhanka dareemaha. dhimirka ama iirka.

## Goobta Dhagaysiga dacwada lagu Qabanaayo

Inta badan dhagaysiga dacwooyinka waxaa lagu qabtaamid kamid ah qolalka dhagaysiga ee Office of Hearing Examiner (Xafiiska Baaraha Dhagaysiga dacwadaha) oo kuyaala dabaqa 40<sup>aad</sup> ee Seattle Municipal Tower, 700 5<sup>th</sup> Avenue, inta udhaxaysa wadooyinka Cherry iyo Columbia Streets bartamaha Seattle. Haddii aad doonayso macluumaad laxariira baakinka, fadlan kafiiri *qaybta Tilmaanta Bulshada ee Racfaanada iyo Dhagaysiga Dacwadaha kador Baaraha Dhagaysiga kaasoo kujira webseetka Baaraha*, ama wac Xafiiska.



## City of Seattle Baaraha Dhagaysiga dacwada

700 5<sup>th</sup> Avenue  
Seattle, WA 98104  
Boostada: P.O. Box 94729  
Seattle, WA 98124-4729  
Taleefoonka (206) 684-0521  
Fakiska (206) 684-0536  
[www.seattle.gov/examiner](http://www.seattle.gov/examiner)

**SAACADAHA XAFIISKU SHAQEEYO**  
**ISNIIN-JAMCE**  
**8:00 AM – 5:00 PM**



## City of Seattle



## Office of Hearing Examiner

**Tani waa tilmaan aan toos ahayn  
oo kusaabsan DHAGAYSIGA  
DACWADAHA oo lagu qaadaayo  
Baaraha Dhagaysiga dacwadaha  
ee Seattle**

Macluumaad si buuxda udhamaystiran waxaad kahelaysaa Seattle Municipal Code Chapters 23.91 (Xeerka Maamulka Maagalada Seattle Cutubyadiisa yihiin 23.91) (Xadgudubyada kadhanka ah Land Use Code); 10.52 (Xadgudubyada kadhanka ah Weed and Vegetation Code); 22.920 (Kutakri falka Tamarta); iyo 15.91 (Xadgudubyada kadhanka ah Adeegsiga Wadada). Cutubyaadan katirsan xeerka waxaad kahelaysaa webseetka magaalada oo ah <http://clerk.seattle.gov>.

## Goorta iyo qaabka loocodsan karo Racfaanka



**Goorta:** Racfaanada waa in loogeevayaa Office of Hearing Examiner marka lagaaro 5 p.m. maalinta ugu danbaysay ee mudada looqabtay in lagusoo gudbiyo racfaan. In boosto lagusoo diro maalinta ugu danbaysa **maaha** mid kufilan. Keenista racfaanada oo kujira qaab uun kamid ah adeegga boostada USPS waxay daahi karaan dhawr maalmood. Waqti hore soodir haddii aad racfaanka kusoo gudbinayso boostada. Jawaabta laga bixinaayo dacwada waa in lasoo gaarsiiyaa Xafiiska Baraaha Dhagaysiga dacwada muddo ugu danbayn 15 maalmood ah kadib marka laqabto dacwada. Haddii maalinta ugu danbaysa mudada racfaanku ay tahay Sabti, Axad, ama maalin fasax oo federal, heer gobal ah, mudada waxaa lagusii kordhinayaa ilaa markay saacadu tahay 5:00 p.m. ee maalinta xigta oo ah maalin shaqo.

**Qaabka loodiraayo:** Foomka soogudbinta racfaanka waxaa lagu soo darayaa amarka dacwada, asagoo inta badan dhabarka uga dhagan dacwada. (Haddii wax kamid ah macluumaadka amarku kaduwanayahay macluumaadka kuqoran foomkaan macluumaadka, macluumaadka kuqoran amarka dacwada ayaa laraacayaa.) Waxaad sidoo kale oonleen kusoo diri kartaa codsigaaga racfaanka, adoo adeegsanaaya Office of Hearing Examiner oo ah: [www.seattle.gov/examiner/efile.htm](http://www.seattle.gov/examiner/efile.htm).

Qofka ayaa codsan kara **dhagaysi dhexdhexaadin ah** si uu usharaxo arimaha kuxeeran xadgudubka loohaysto. Qofka codsada dhagaysi dhexdhexaadin ah wuxuu aqbalayaa in xad gudub uu dhacay, laakiin wuxuu qabaa inay jiraan sababo keenay xadgudubka kuwaasoo sabab unoqon kara yaraynta ganaaxa lasaaro. XASUUSNOOW: Wixii laxariira awaamiirta Xeerka Adeegsiga Dhulka, Baaraha Dhagaysiga dacwada mayarayn karo ganaaxa maxkamada ilaa in hantidu noqoto mid waafaqsan xeerka kahor intaan laqaban dhagaysiga dhexdhexaadinta ah.

Qofka, ayaa, taas badalkeed, codsan kara dhagaysi cabasho ah asagoo cuskanaaya sababta arinta xadgudubka sharcigu soo jeediyay aysan udhicin, ama sababta uusan qofka amarka lasaaray masuul uga ahayn xadgudubka.

## Taariikhda Dhagaysiga dacwada



Marka racfaan lasoo gudbiyo, waxaa ladajiyaa taariikhda dacwada ladhagaysanaayo, waxaana lagusoo dirayaa ogaysiiska taariikhda dhagaysiga, waqtiga iyo goobta lagu qabanaayo dhagaysiga taasoo loodiraayo cidkasta oo racfaanka qayb ka ah (racfaan qaataha iyo Waaxda).

## Dhagaysiga



**Goobta:** Inta badan dhagaysiga dacwooyinka waxaa lagu qabtaamid kamid ah qolalka dhagaysiga ee Office of Hearing Examiner oo kuyaala dabaqa 40<sup>aad</sup> ee Seattle Municipal Tower, 700 5<sup>th</sup> Avenue, inta udhaxaysa wadooyinka Cherry iyo Columbia Streets bartamaha Seattle. Haddii aad doonayso macluumaad laxariira baakinka, fadlan kafiiri qaybta *Tilmaanta Bulshada* kaasoo kujira webseetka Baaraha Dhagaysiga, ama wac Xafiiska adoo kawacaaya nambarka kuqoran foomkaan macluumaadka.

**Hanaanka laraacaayo:** Waa muhiim inaad ilaaliso waqtiga dhagaysiga, ama aad nasoo wacdo haddii si aadan lafilayn lagu xanibo. Inaad nasoo wici waydo waxay sababaysaa in racfaankaaga la iskatuuro. Dhagaysiyada cabashada ah, Waaxda ayaa keenaysa kiiskeeda marka hore, ayadoo sharxaysa sababta amarka loosoo saaray iyo sida ay uwaafaqsan tahay Shuruudaha xeerka awaamirta. Intaas kadib qofka racfaanka qaadanaaya ayaa soo gudbinaaya kiiskiisa, asagoo sharaxaaya sababta arinta xadgudubka sharcigu soo jeedshay aysan udhicin, ama sababta uusan qofka amarka lasaaray masuul uga ahayn xadgudubka. Marqaati kasta wuxuu bixinayaa marqaati kaciisa asagoo ladharaanaayo, dhinaca kale ayaana waydiin kara marqaatiga su'aalo laxariira mawduuca dacwada ee kujira marqaati kaca marqaatiga. Dhinac kasta wuxuu adeegsan karaa muuqaalo, sida sawiro, jorooyin, iwm., si ay ugu noqdaan cadayn, laakiin koobiga muuqaal kasta waa in loodhiibaa Baaraha Dhagaysiga dacwada iyo dhinaca kale ee dacwada kujira. Marka lakeeno dhamaan cadaymaha, koox kasta waxay soo koobaysaa doodeeda.

Hababka looraaco dhagaysiyada dhexdhexaadinta ah maaha kuwo toos ah, Baaraha ayaa waydiinaaya su'aalo labadaba racfaan qaataha iyo Waaxda si uu go'aan uga gaaro in ganaaxa xadgudubka layarayn karo.

## Ma Ubaahan Tahay Qareen?



Maaha muhiim inaad latimaado gar yaqaan, umana baahnid inaad qareen naftaada unoqoto si aad umatasho shaqsiyadaada ama qofkale oo kujira dacwad kasocota Baaraha Dhagaysiga dacwada. Dadka qaar iyo ururada waxaa wakiil ka ah qareeno markay galayaan dhagaysiyada racfaanka, laakiin muwaadiniin badan iyo wakaaladaha Magaalada ayaa nafsadooda matala. Si loogu fududeeyo hanaanka dadka aan qareenada ahayn, baarayaasha ayaa sharxi kara dhinacyada kaladuwan ee dhagaysiga intay wadaan hadalkooda furitaanka dacwada waxayna codsadaan in su'aalo ay waydiiso cidii rabta, taasi tilmaan sharci masiinayso dhinacna. Banaanka dhagaysiga, haddii aad su'aalo kaqabto hanaanka dhagaysiga waxaad waydiin kartaa shaqaalaha jooga Office of Hearing Examiner, inkastoo aysan kusiin karin talooyin qaas ah oo laxariira arimaha xasaasiga ah, sida inay kuudiyarshaan kiiskaad gudbin lahayd ama inay kuudooraan marqaatiyaal, aysana kusiin karin talo sharci.

## Go'aanka Baaraha Dhagaysiga dacwada



Baaraha Dhagaysiga dacwadu wuxuu dib u eegis kusamaynayaa cadaynta lakeeno asagoo kafiirinaaya waxa sharcigu kadoonaayo kadibna wuxuu soosaarayaa go'aanka laga gaaro racfaanka. Kiisaska dhexdhexaadinta, go'aanka waxaa lagaaraa caadiyan marka dhagaysiga dacwadu dhamaato. Kiisaska racfaanka, Baaruhu wuxuu soosaarayaa go'aan qoraal ah kadib marka dhagaysigu dhamaado kuwaasoo ay caadiyan kujiraan "Findings of Fact (Raadinta Xaqiiqooyinka)," "Conclusions (Gabagabada)," iyo "Decision (Go'aanka)" laga gaaro kiiska. Go'aanka Baaraha Dhagaysiga dacwada waxaa racfaan looga qaadan karaa maxkamada.